



Warbixinta Sannadlaha ee 2024

 MINNESOTA

Tusmada Mawduucyada

Ku Saabsan	1
Horumarro Muhiim ah	3
Wareegga MNSC: Dulmar Guud.	4
Wareegga MNSC: Ururinta Sheekooyinka.	5
Yaa Nala Wadaagay?.	6
Xogta Dadweynaha (Demographics)	7
Wareegga MNSC: Fahamka Sheekooyinka.	9
Wareegga MNSC: Milicsiiyo La-qabsasho.	10
La-hawlgalayaasha Bulshada.	11
La-hawlgalayaasha / Iskaashiga Hay'adaha Dawladda.	13
Saameynta.	14
Maxaa Xiga?.	15

Ku Saabsan

MN StoryCollective (MNSC) waa hab lagu wadaago waayo-aragnimooyinka, lagu abuurto fikrado isbeddel keena, laguna taageero bulshooyinka kala duwan ee ku nool gobolka. Tan waxaan ku sameynaa annagoo ururinayna sheekooyin iyo xog kale oo ka imanaya dadka ku nool Minnesota, la falgalayna dejiyeyaasha siyaasadaha iyo bulshooyinka si loo fahmo sheekooyinka la ururiyay, isla markaana go'aan-qaadayaasha lagu xiro fikrado horseedi kara isbeddel.

MNSC waxaa la bilaabay sannadka 2023, waxaana dhiirrigeliyay mashruuca Our Tomorrows ee Xarunta Iskaashiga Dadweynaha iyo Cilmi-baarista (Center for Public Partnerships and Research) ee Jaamacadda Kansas. MNSC waxay isu keentaa bulshooyinka iyo hay'adaha dawladda si loo fahmo loogana barto xog tayo leh (qualitative) iyo xog tiro-koob ah (quantitative), kadibna, iyadoo lagu saleynayo casharradaas, loo soo bandhigo fikrado taageeraya fayo-qabka bulshada. Tani waa wareeg jawaab-celin oo macno leh oo wax-ku-ool ah, kaas oo waayo-aragnimada dhabta ah ee dadka ay ku jirto bartamaha. Dawladda Minnesota waxay doonaysay in la yareeyo tirada jeer ee xubnaha bulshada laga codsado inay xogtooda wadaagaan, isla markaana la sameeyo nidaam dib loogu laabanayo bulshada si loola wadaago cusboonaysiin ku saabsan wixii laga maqlay sheekooyinka iyo kulamada faham-wadaagga (sensemaking sessions).





Yoolalka iyo Himilada

Yoolalka MNSC waa in la abuuro wareeg jawaab-celin oo xooggan oo lala yeesho bulshooyinka ku kala sugan guud ahaan Minnesota, isla markaana la bixiyo ilo joogto ah oo dabacsan oo xog tayo leh (qualitative data) ah, kuna saleysan sheekooyin kala duwan oo bulshooyinka ka imanaya, si barnaamijyada, siyaasadaha, iyo hab-raacyada dawladda ay si ka wanaagsan ugu daboolaan baahiyaha dhammaan qoysaska.

Himilada MNSC waa in shaqada diiradda saaraysa waayo-aragnimada dhabta ah ee dadka (lived experiences)—iyada oo loo marayo ururinta sheekooyinka iyo faham-wadaagga (sensemaking)—si buuxda loogu dhex daro shaqada barnaamijyada iyo adeegyada dawladda.

Kooxda MNSCeam

MNSC waxaa maamula oo hirgeliya kooxda Maareynta Natiijooyinka (Results Management) ee Minnesota Management and Budget (MMB), waxaana hagta koox maamul oo ka kooban hay'ado kala duwan. Kooxdan waxaa ka mid ah agaasimayaal ka socda Waaxda Waxbarashada Minnesota, Minnesota Management and Budget, Waaxda Caafimaadka Minnesota, Waaxda Adeegyada Aadanaha Minnesota, iyo Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska Minnesota.

La-hawlgalayaasha bulshada waxay door muhiim ah ka ciyaaraan shaqada MNSC. La-hawlgalayaasha hadda jira iyo kuwii hore labadaba waxaa ka mid ah ururro u adeegaya dadka ku nool guud ahaan Minnesota. MNSC waxay maalgelisaa la-hawlgalayaasha bulshada si ay u ururiyaan sheekooyin, hoggaan uga noqdaan fahamka iyo falanqaynta sheekooyinka ay ururiyaan, isla markaana ay bixiyaan jawaab-celin ku saabsan hindisahan. In la shaqeeyo la-hawlgalayaal horey ula lahaa bulshooyinka xiriirro maxalli ah oo lagu kalsoon yahay waxay taageertaa ka-qaybgal qoto dheer oo dhab ah. (Eeg bogga [xx] si aad wax badan uga ogaato ka-qaybqaadashada la-hawlgalayaasha bulshada ee MNSC).

Horumarro Muhiim ah



Horumarro Muhiim ah oo MNSC ay gaartay sannadka 2024, waxaa ka mid ah:



1 madal cusub oo
ururinta
sheekooyinka ah



In ka badan 600
sheeko guud
ahaan la
gudbiyay



16 kulan faham-
wadaag
(sensemaking
sessions)



4 hay'adood oo
dawladeed oo
maalgelin ku
sameeyay MN
StoryCollective



Qalabka MN StoryCollective oo
lagu heli karo 5 luqadood oo
dheeraad ah
(Ingiriisi, Hmong, Karen,
Soomaali, iyo Isbaanish)



Warbixinta sannadlaha ah
oo loo turjumay luqado
kala duwan



1 boos oo MNSC
Fellowship ah oo la
bilaabay




7 la-hawlgalayaal bulsho, oo ay ka
mid yihiin:
(Good Trouble, HueMan Partnership,
Humanize MN, Indigenous Visioning,
Aviellah Curriculum and Consulting,
United Way of Central MN, iyo
Chinese Community Center)

Wareegga MNSC: Dulmar Guud

MNSC waxay raacdaa wareeg afar-tallaabo ah:

- 1 Ururinta sheekooyinka
- 2 Faham-wadaag iyo soo jeedin tallaabooyin la qaadi karo
- 3 Milicsi iyo la-qabsasho
- 4 Dib-u-laabasho

Habkan wuxuu gacan ka geysanayaa in shaqada MNSC ay noqoto mid ku habboon oo waxtar u leh llabadaba la-hawlgalayaasha bulshada iyo saaxiibbada heer gobol. Qaybaha hoos ku xusan waxa ay bixiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaabo kasta oo ku jirta wareeggan.



Wareegga MNSC: Ururinta Sheekooyinka

Qalabka Ururinta Sheekooyinka

MNSC waxay ku martiqaadaa dadka inay wadaagaan wax kasta oo iyaga u arkaan inuu ugu muhiimsan yahay sheekadooda, iyo sidoo kale xaaladdooda iyo waayo-aragnimadooda hadda jirta, iyagoo adeegsanaya qalab online ah (oo laga heli karo: <https://ourtomorro.ws/MNStoryCollective>). Dadka sheekooyinka wadaagaya waxay ka jawaabaan su'aal furan oo sheeko ah, kadibna waxay ka jawaabaan su'aalo dabagal ah.

Sannadka 2024, su'aasha sheekadu waxay ahayd: *Ka fikir sida ay tahay in bulshadaada lagu noolaado.*

Meesha hoose, nooga warran waayo-aragnimo shakhsiyeed oo dhowaan kugu dhacday oo aad u aragto mid muhiim ah. Sheekadaadu waxay ku saabsan tahay adiga, qoyskaaga, ama bulshadaada. Waxaad ka sheekeyn kartaa waayo-aragnimo wanaagsan ama mid adagba. Noo sheeg waxa dhacay.

Qalabku wuxuu sidoo kale casuumaa dadk inay kala saaraan sheekadooda, ama ay "is-qeexaan (self-code)," iyagoo ka jawaabaya su'aalo dabagal ah. Habka is-qeexidda wuxuu ka kooban yahay su'aalo xulashooyin leh (multiple-choice) sida, "Imisa jeer ayay dhacaan waayo-aragnimooyin la mid ah tan aad wadaagtay?" iyo su'aalo milicsi leh sida, "Maxaad rajaynaysaa in dadka kale ay ka fahmaan ama ka bartaan sheekada aad wadaagtay?"

Dadka sheekada wadaagaya waxay haystaan fursad ay ku bixiyaan macluumaad dheeraad ah haddii xulashooyinka hore loo diyaariyay aysan ka tarjumin waayo-aragnimadooda. Sidoo kale waxaa jira su'aalo ku saabsan waxa kor u qaadi kara fayyo-qabka dadka kale ee ku jira xaalado la mid ah.

MNSC waxay u ururisaa sheekooyinka habkan sababo dhowr ah awgood. Adeegsiga su'aal furan waxay u oggolaanaysaa mas'uuliyiinta dawladda inay wax ka bartaan waxa sheeko-wadaagayaasha ugu muhiimsan, halkii xogta lagu koobnaan lahaa barnaamij ama siyaasad gaar ah. Habka "is-qeexidda (self-coding)" wuxuu sidoo kale ka caawiyaa shaqaalaha

ladda iyo go'aan-qaadayaasha inay fahmaan wixii la wadaagay iyagoo ku saleynaya da5w



Hababka Ururinta Sheekooyinka

Dadka waxay ku wadaagi karaan sheekadooda qalabka online-ka ah siyaabo kala duwan. Inta badan jawaabaha ilaa hadda la helay waxaa ururiyay la-hawlgalayaasha bulshada (eeg bogga 12 si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho la-hawlgalayaasha bulshada), iyagoo adeegsanaya habab kala duwan oo ururin ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin: (1) gudbin madax-bannaan oo la sameeyo kadib wacyigelin ka timid la-hawlgalaha, (2) ururin la fududeeyay oo u dhacda qaab wareysi ah, iyo (3) mararka qaarkood, waqti si gaar ah loogu qoondeeyay wadaagista sheekooyinka oo qayb ka ah kulan ballaaran oo fool-ka-fool ah. Intaa waxaa dheer, MNSC waxay leedahay xiriir ururin oo online ah oo la heli karo, kaas oo lagu wadaagi karo isgaarsiinta dadweynaha sida warsideyaasha, xayaysiisyada baraha bulshada, iyo marka laga qeybgalayo munaasabadaha bulshada.

Yaa Nala Wadaagay?

MNSC waxay heshay in ka badan 600 guddin (submissions) sannadka 2024, kuwaas oo ka yimid 30 degmo (counties) iyo bulshooyinka Qabiillo (Tribal communities), isla markaana ka yimid dad leh asal iyo waayo-aragnimooyin kala duwan.

Hoos waxaa ku qoran tusaale ka mid ah sheeko



Cinwaan uu soo gudbiyay qofka sheekada wadaagay ECFE waa fursad lagu xiriirayo

Bulsho kala duwan dhexdeeda, waxaan muddooyinkan dambe uga mahadcelinayay fursadaha aan ku yeeshay xiriirro macno leh oo aan la sameeyo dad aniga iga duwan. Mid ka mid ah meelaha ay tani dhowaan ka dhacday waa Early Childhood and Family Education. Inta lagu jiro waqtiga waalidiinta loogu talagalay ee kooxaha yaryar, waxaan la fariistaa hooyooyin iyo aabbayaal leh duruufo dhaqaale iyo bulsho, diimeed, iyo siyaasadeed oo gebi ahaanba ka duwan kuwayga. Waxaan wadaagnaa waayo-aragnimada waalidnimada, waxaana isugu nimaadnaa jawi ixtiraam leh oo aan awoodno inaan wax iska baranno. Ka qaybgalka fasalladan wuxuu iga dhigaa waalid iyo xubin bulsho oo ka wanaagsan, waxaana ku faraxsanahay in Minnesota ay mudnaan siiso waxbarashada iyo taageerada qoysaska habkan.



Waxbarashada
Maalgelinta



Wax-ka-
barashada
asxaabta



Ixtiraam marka
ay jiraan kala
duwanaansho

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan qofka sheekada wadaagay:

Waxay ku nool yihiin Degmada Anoka, waa waalid carruur la korsaday, waxayna tilmaameen in kharashka daryeelka carruurta uu yahay kharashka ugu weyn ee miisaaniyaddooda. Sidoo kale, dhawaan waxay ku qasbanaadeen inay yareeyaan ama ka tanaasulaan kharashaadka daryeelka caafimaadka maskaxda iyo kan jirka sababo la xiriira miisaaniyaddooda.

Maxaad rajaynaysaa in dadka kale ay ka qaataan sheekada aad nala wadaagtay?


Haddii aad tahay waalid carruur yaryar leh, isku day ECFE!

Xogta Dadweynaha (Demographics)


MNSC waxay ururisay sheekooyin ka kala yimid guud ahaan Minnesota. Jaantusyada ku yaal boggan waxay muujinayaan macluumaad ku saabsan aqoonsiyada isirka iyo qowmiyadda, iyo xaaladaha daryeelaha ee dadka sheekooyinka wadaagay, kuwaas oo ka qeyb qaatay daabacaadda labaad ee qalabka ururinta sheekooyinka. Macluumaad dheeraad ah oo la xiriira xogta dadweynaha, oo ay ku jiraan bulshada iyo da'da, waxaa laga heli karaa bogga xiga.



Aqoonsiyada Isirka iyo Qowmiyadda




Xaaladaha Daryeelaha




*Calaamadda asalka ah ee sahanka: 'Wax kale oo ku saabsan doorkayga waalidnimo ama daryeelid ah ayaa muhiim ah (fadlan noo sheeg faahfaahin dheeraad ah).'

Dadka sheekooyinka wadaagay waxaa lagu dhiirrigeliyay inay doortaan dhammaan xulashooyinka khuseeya. Boqolleydu waxay matalayaan saamiga dadka sheekooyinka wadaagay ee doortay xulasho kasta.

Sharaxaadaha Bulshada



Kala duwanaanshaha Da'da



Wareegga MNSC: Fahamka Sheekooyinka

Marka sheekooyinka iyo jawaabaha kale la ururiyo, bulshooyinkuna waxay ka qayb qaataan kulammo faham-wadaag ah. Inta badan, MNSC waxay isu keentaa xubnaha bulshada, ururrada bulshada ee la-hawlgala, iyo shaqaalaha heer gobol, degmo, iyo magaalo si ay uga wada hadlaan waxa ay sheekooyinka iyo xogta kale u micneeyaan. MNSC waxay kulammadan ugu yeertaa “kulammo faham-wadaag ah.”

Maxaa Ka Dhaca Kulanka Faham-Wadaagga?

Ka hor kulammada, MNSC waxay diyaarinaysaa “xirmooyin sheeko,” kuwaas oo ah ururin ka kooban sheekooyin, muuqaallo xogeed, iyo su’aalo dood-hagaajin ah oo hagaya wada hadalka. Kulammadu badanaa waxay ka kooban yihiin dood-kooxeedyo yaryar iyo wadaagid guud. Kulammadu caadi ahaan waxay socdaan 90 daqiiqo ilaa 3 saacadood, waxaana diiradda la saaraa akhrinta iyo ka doodista sheekooyinka. Kulammadu inta badan waxay ku soo dhammaadaan hawl ku jihaysan tallaabo, halkaas oo ka-qaybgalayaashu ay ka doodaan sida Dowladda, ururrada bulshada, iyo shakhsiyaadkuba uga jawaabi karaan arrimaha, caqabadaha, iyo guulaha laga wada hadlay intii kulanku socday.



Tusaalooyin ka mid ah Kulammada Faham-Wadaagga Bulshada ee la qabtay sannadka 2024

- Kulammo onleen ah (Virtual)
- Kulammo faham-wadaag ah oo lagu qabtay isu-imaatinnada helitaanka cuntada ee Morton, Bemidji, iyo Saint Paul
- Kulammo faham-wadaag ah oo lagu qabtay munaasabadaha hay’adaha dawladda, oo ay ku jirto isu-imaatinka Fursadaha Waxbarasho ee La Kordhiyey ee Waaxda Waxbarashada Minnesota (MN Department of Education) ee Eagan
- Kulammo ay wada naqshadeeyeen lammaaneyaasha bulshada, oo lagu qabtay Bloomington, Saint Cloud, iyo Waqooyiga Minneapolis


Wareegga MNSC: Milicsi iyo La-qabsasho

Inta lagu jiro labada marxaladood ee ugu horreeya wareegga (ururinta sheekooyinka iyo faham-wadaagga), MNSC waxay ururisaa ilo macluumaad oo kala duwan—oo ay ku jiraan sheekooyin, xog laga helay jawaabaha su'aalaha kale, iyo fikrado laga soo jeediyey Kulammada Faham-Wadaagga—waxayna xogtaas la wadaagtaa lammaaneyaasha bulshada iyo kooxaha dawladda.

MNSC sidoo kale waxay codsataa jawaab-celin ku saabsan qaybaha muhiimka ah ee hindisaha, sida qalabka ururinta sheekooyinka, waayo-aragnimada lammaaneyaasha bulshada ee ka-qaybgalka, iyo arrimo kale. Sannad kasta, MNSC waxay waqti u haysaa in jawaab-celintan loo adeegsado horumarinta hindisaha.

Maxay Muhiim u Tahay Milicsiga iyo La-qabsashadu?

MNSC si firfircoon ayay uga raadisaa jawaab-celin wada-hawlgalayaasha, waxayna sannad kasta u qoondeysaa waqti milicsi iyo la-qabsasho. MNSC waxay si weyn ugu tiirsan tahay jawaab-celinta lammaaneyaasha, ka-qaybgalayaasha, iyo saaxiibbada shaqada si ay u qaabeeyaan shaqadeenna:



Milicsiga iyo la-qabsashadu waa udub-dhexaadka MNSC. Sannadka 2024, waxaa la sameeyey isbeddello ballaaran oo lagu sameeyey qalabka ururinta sheekooyinka, horumarinta habab cusub oo lagu xoojiyo ka-qaybgalka iyo taageerada lammaaneyaasha bulshada, hagaajinta hababka iyo hawlaha faham-wadaagga, iyo sidoo kale wanaajinta hababka lagu diiwaangeliyo, lagu warbixiyo, laguna soo celiyo xogta xubnaha bulshada iyo lammaaneyaasha.



La-hawlgalayaasha Bulshada

Sannad kasta, MMB waxay adeegsataa hannaan dadweyne si ay ula heshiiso ururro ku saleysan bulshada, kuwaas oo ka shaqeeya wacyigelinta MNSC, ururinta sheekooyinka, taageeridda kulamada faham-wadaagga, iyo bixinta jawaab-celin ku saabsan dhammaan qaybaha barnaamijka. La-hawlgalayaashan waxay qandaraas la galaan Gobolka Minnesota si ay u fududeeyaan ururinta sheekooyinka ee shabakadooda, iyaga oo gaarsiinaya bulshooyinka ay sida ugu dhow ula shaqeeyaan, si waayo-aragnimadooda loogu daro barnaamijkan.

La-shaqeynta la-hawlgalayaasha bulshada waxay u saamaxdaa MNSC inay gaarto dad ku kala sugan guud ahaan gobolka, iyada oo loo marayo shabakad lagu kalsoon yahay. La-hawlgalayaasha bulshadu waxay ururiyaan sheekooyinka iyadoo loo eegayo waxa sida ugu habboon ugu shaqeeya bulshadooda. Sannadka 2024, in ka badan 75% ka mid ah in ka badan 600 gudbin (submissions) ayaa lagu soo diray xiriir ([link](#)) ay bixiyeen la-hawlgalayaasha bulshada.





Lammaaneyaashii ka qayb qaatay sannadka 2024 waxaa ka mid ahaa:

- Avillah Curriculum and Consulting
- Chinese Community Center
- Good Trouble
- HueMan Partnership
- Humanize MN
- Indigenous Visioning
- United Way of Central Minnesota

Maxaa Cusbaa Sannadka 2024?

Mid ka mid ah natiijooyinka ugu muuqda ee ka dhashay waqtii MNSC ee milicsiga iyo la-qabsashada sannadka 2024 wuxuu ahaa dib-u-naqshadeyn weyn oo lagu sameeyey qalabka ururinta sheekooyinka, oo ay ku jirto u guurista madal cusub oo suurtagelinaysa qaar ka mid ah isbeddelladii la codsaday. Qaybtani waxay iftiiminaysaa tusaalooyin kooban oo ka mid ah isbeddellada lagu sameeyey qalabka ururinta sheekooyinka. MNSC waxay sii waddaa habkan sannadka 2025, waxayna mustaqbalka la wadaagi doontaa sida shaqadu isu beddeshay iyadoo lagu saleynayo jawaab-celinta lammaaneyaasha iyo ka-qaybgalayaasha; inta ka horreysa, waxaad iska diiwaangelin kartaa warsidahayaga si aad ula socoto wixii cusub.

MNSC sannad kasta waxay waqti u haysaa milicsi iyo la-qabsasho. Lammaaneyaasha bulshada ayaa bixiya jawaab-celin ka caawisa qaabeeynta horumarka joogtada ah ee MNSC. Iyadoo lagu saleynayo jawaab-celintii hore ee lammaaneyaasha, MNSC waxay qaadday tallaabooyinkan sannadka 2024:

- Si weyn ayaa wax looga beddelay qalabka ururinta sheekooyinka (eeg qaybtii hore ee Milicsiga iyo La-qabsashada).
- Waxaa la sameeyey hannaan cusub oo lagu soo dhaweynayo lammaaneyaasha bulshada (onboarding), kaas oo diiradda saaray wada hadal dheeraad ah iyo tusaalooyin wax ku ool ah oo ku saabsan ururinta sheekooyinka, kulankana loo kala qaybiyey kulammo badan..
- Waxaa la diyaariyey agab wacyigelin oo cusub, oo ay ku jiraan Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo ee Sheekoyaasha (Storyteller FAQ) iyo waraaqo xayeysiin ah oo dheeraad ah, sidoo kale waxaa la hagaajiyey qaab-dhismeedka iimayllada iyo qodobada hadalka ee ururiyayaasha sheekooyinka.
- I Waxaa lagu daray wada-naqshadeynta kulammada faham-wadaagga shaqada lammaaneyaasha, waxaana la taageeray lammaaneyaasha si ay go'aanno uga gaaraan kulammadooda.
- Wada-shaqeyn iyo wada-naqshadeyn kulammada faham-wadaagga.

Iskaashiga iyo Wada-shaqeynta Hay'adaha Dawladda

MNSC waxay la shaqaysaa la-hawlgalayaal bulsho oo ku kala sugan guud ahaan gobolka, iyo kooxo ka tirsan hay'adaha dawladda. La-shaqeynta kooxaha dawladda waxay taageertaa yoolka ah in xogta iyo hababka MNSC lagu dhex daro shaqada joogtada ah ee lagu xoojinayo codadka bulshada marka loo adeegayo dadka ku nool guud ahaan Minnesota. La-hawlgalayaasha heer gobol iyo heer degmo ee maamula miisaaniyadaha iyo siyaasadaha barnaamijyada ayaa markaas awood u leh inay casharrada la bartay ku daraan isbeddellada la sameynayo. Sannadka 2024, MNSC waxay taageertay kor u qaadista fahamka arrimaha saameeya nolosha dadka siyaabo badan, kuwaas oo qaar ka mid ah lagu iftiimiyay boggan.

Tusaale ku saabsan adeegsiga xogta MNSC:

Dabayaaqadii Oktoobar 2024, MNSC waxay ka shaqeysay bixinta sheekooyin ka yimid waalidiin da'yar (teen parents) si loo gaarsiiyo kooxda Barnaamijka Maalgashiga Qoysaska Minnesota (Minnesota Family Investment Program – MFIP) ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska. Ujeeddada kooxda MFIP ee akhrinta sheekooyinkan waxay ahayd inay wax ka bartaan xog horey loogu wadaagay MNSC, iyaga oo isu diyaarinaya ka-qaybgalka ay la yeelan doonaan waalidiinta da'da yar sannadka 2025. Mid ka mid ah yoolalka MNSC waa in la yareeyo tirada jeer ee xubnaha bulshada lagu qasbo inay sheekooyinkooda marar badan ugu celiyaan kooxaha dawladda. Kooxda MFIP waxay ogaatay inay doonayaan inay la shaqeeyaan waalidiinta da'da yar sannadka soo socda, sidaas darteedna ay u akhriyeen sheekooyinka ka yimid bulshadaas, maadaama ay aaminsan yihiin in “ururinta fahamyadan ay gacan ka geysan karto go'aaminta sida aan u martigelin doono kulamada mustaqbalka,” sida uu sheegay xubin ka tirsan kooxda MFIP. MNSC waxay si farxad leh u bixisay sheekooyinka iyo aragtiyaha waalidiinta da'da yar si ay u xoojiso kulamada ka-qaybgalka mustaqbalka ee kooxda MFIP..

Tusaale ku saabsan iskaashiga hay'adaha:

MNSC waxay la shaqeysay laba kooxood oo ka tirsan Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (Xafiiska Fursadaha Dhaqaale iyo Caawinta Shaqada, iyo Qaybta Taageerada Dhaqaale) inta lagu jiray sannadka 2024, si loo baaro arrimaha gacan ka geysanaya amni-darrada cuntada ee bulshooyinka Minnesota, loona ururiyo loona falanqeeyo xog taageerta xalal jawaab-celin leh oo heer gobol, heer goboleed, iyo heer degmo ah. Kulamo faham-wadaag ah oo loo qabtay si fog (online) iyo si fool-ka-fool ah (Bemidji, Morton, iyo Saint Paul), la-hawlgalayaal dibadeed, hoggaanka Qabiillo, degmooyin, iyo bulshooyin ayaa isugu yimid si ay u akhriyaan sheekooyin una falanqeeyaan xogta. Kadibna waxay aqoonsadeen meelaha ka bannaan (gaps), waxayna ka wada hadleen qaabeynta siyaasadaha, isbeddellada, iyo wax-ka-beddellada, iyaga oo adeegsanaya wareegyo jawaab-celin ah (feedback loops) oo lala yeeshay bulshooyinka la kulma amni-darrada cuntada.

Saameynta

Sannadka 2024, MNSC waxay billowday inay wax ka barato sida sheekooyinka bulshada ay u hagayaan dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada, si loo saameeyo natiijooyinka la gaarayo. MNSC waxaa la aasaasay sannadka 2023 si loo isu keeno bulshooyinka iyo hay'adaha dawladda, loona sameeyo faham iyo wax-ka-barasho ku saleysan xog tayo leh (qualitative) iyo tiro-koob ah (quantitative), kadibna, iyada oo lagu saleynayo casharradaas, loo soo bandhigo fikrado taageeraya wanaagga iyo fayd-qabka bulshada. Tani waa wareeg jawaab-celin oo macno leh oo wax-ku-ool ah, kaas oo waayo-aragnimada dhabta ah ee dadka (lived experience) ay ku jirto bartamaha.

Fikradaha bulshada ayaa hagaya barnaamijyada

MNSC waxay saameyn ku yeelanaysaa barnaamijyada dawladda, oo ay ku jiraan fursadaha maalgelinta. Kulan kasta oo faham-wadaag ah bulshooyinku waxay soo jeediyaan talooyin ku saabsan jawaabo suurtagal ah oo laga bixin karo wixii ay ka wada hadleen ayna u sheegeen sheekooyinka MNSC. Saaxiib ka tirsan hay'ad dawladeed ayaa la wadaagay sida talo bulsho oo ka timid kulan faham-wadaag bulsho ay si toos ah u horseedday ballaarinta noocyada fursadaha loo aqoonsaday inay u qalmaan maalgelinta fursadda kafaala-qaadka fayd-qabka qoyska:

Kooxdayadu waxay la xiriiraysay bulshada si ay uga warbixiso fursad kafaala-qaad ah. Waxaan bixinaynaa kafaala-qaad lacageed oo u dhexeeya \$1,000 ilaa \$5,000. Sidoo kale, waxaan maqalnay muhiimadda ay leeyihiin shabakadaha bulsheed iyo xiriirrada bulshada (social capital). Sababtaas awgeed, waxaan ballaarinay cidda u qalanta fursaddan kafaala-qaadka ah, annagoo ku darnay munaasabadaha xaafadaha sida xafladaha waddooyinka (block parties).

— La-taliye Ka-hortag ku Saleysan Bulshada, Dhiirrigelin iyo Ka-hortag,

Badbaadada Carruurta, iyo Joogtaynta Daryeelka

Isbeddelka lagu sameeyay fursadda maalgelinta kadib Kulanka Faham-Wadaagga wuxuu ahaa in lagu daro xafladaha xaafadaha (block parties) inay noqdaan munaasabad bulsho oo u qalanta maalgelintan.

Wareegyada jawaab-celinta bulshada ayaa la abuura lana xoojiyaa

Shaqaalaha hay'adaha dawladda ee Minnesota waxay wadaageen tusaalooyin muujinaya sida MNSC uga caawisay xoojinta wareegyadooda jawaab-celinta, iyaga oo la shaqeynaya la-hawlgalayaal iyo bulshooyin:

MN StoryCollective waxay ahayd madal aad u wanaagsan oo aan u adeegsannay shaqada la xiriirta amniga cuntada. Waxaan awoodnay inaan wadaagno sheekooyin ku saabsan nolosha dhabta ah ee dadka, taas oo ka caawisay ka-qaybgalayaasha inay ka fikirkaan sida barnaamijyadeennu u saameeyaan dadka. Waxaan sidoo kale awoodnay inaan ka shaqeyno barnaamijyo kala duwan si wadajir ah, una abuurno talooyin ku saabsan sida barnaamijyada loo horumarin karo. Intaa waxaa dheer, waxaan dib ula wadaagnay waxyaabo qaar oo aan horey ugu darnay ama aan hadda ka shaqeynaynay.

— Ku-xigeenka Agaasimaha, Qaybta Caawinta Dhaqaale iyo Taageerada Shaqada,

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska

Ma Sheekooyin bulsho oo dheeraad ah ayaa la ururinayaa

83% ka mid ah shaqaalaha hay'adaha dawladda ee codsaday kulamada faham-wadaagga ee kooxahooda waxay qorsheynayaan inay ururiyaan sheekooyin dheeraad ah oo ka imanaya bulshada, ama horey ayay u bilaabeen ururintaas. Sidoo kale, waxay ku darayaan sheekooyinka bulshada qiimeyntooda, falanqayntooda, iyo baaritaankooda ku saabsan saameynta barnaamijyada iyo adeegyada.

Maxaa Xiga



Waxaan eegaynaa wajiga xiga ee shaqada, oo ay ku jiraan:



Soo saaridda nooc cusub oo ka mid ah qalabka ururinta sheekooyinka



La-shaqeynta lammaaneyaasha cusub ee bulshada



Soo dhoweynta laba xubnood oo cusub oo ku biiraya kooxda



La wadaagidda macluumaad ku saabsan isbeddellada ka dhex muuqda sheekooyinka la wadaagay



La-shaqeynta hay'adaha helay deeqaha barnaamijyada dawladda si sheekooyin looga ururiyo bulshooyinkooda, oo ay ku jiraan hay'adaha helay deeqaha Xarunta Ilooyinka Bulshada (Community Resource Center)



Wada-naqshadeynta kulammo faham-wadaag ah oo lala yeesho lammaaneyaasha bulshada, kuwaas oo ka dhici doona guud ahaan Minnesota

Mahadsanid

Anagoo ku hadleya magaca kooxda Maamulka MN StoryCollective, waxaan kuugu mahadcelinaynaa xiisaha aad u muujisay MN StoryCollective, shaqadeenna, iyo sheekooyinka dadka ku nool Minnesota. Waxaan rajeyneynaa inaad ku riyaqday dulmarkan ku saabsan MNSC, yoolalkeenna iyo aragtideenna, wareeggeenna gaarka ah ee ka-qaybgalka, iyo sahmintada cidda nala wadaagtay sheekooyinkooda.

Waxaan rajeyneynaa inaad sheekadaada nala wadaagto sannadka 2025.



